

Macluumaad ku saabsan koorsooyin billaabanaya 1.4.2018

Baro Jarmalka–waa muhiim!


Dowladda federaalka iyo tan Canton-kaba waxay taageeraan dadka daggan gobolka Canton St. Gallen inay helaan aqoon ama koorso Jarmal ah ilaa heerka B1.

Waxaa loo ogol yahay inay helaan qiimo dhimis gaaraysa 200 xagga aqoonta iyo 200 xagga cashirrada Jarmalka haddii shuruudahan soo socda laga helo:

- In deegaankoodu yahay gobolka Canton St.Gallen.
- Dakhligooda la canshuuri karo uu ka hooseeyo CHF 40,000.– shakhsiyaadka ama uu ka hooseeyo CHF 55,000.– lamaanayaasha ama qoysaska
- Shakhsiyaadkaa laga gooyneen canshuurta iyo shakhsiyaadka qiimayn canshuur aanan lahayn, boqolkiiba toddobaatan iyo shan (75%) dakhliga soo galo sannadkii ayaa loo xisaabiyaa dakhliga la canshuuri karo.
- Dakhligooda la canshuuri karo wuxuu isku tagayaa in kayar CHF 50,000.–
- Waxay haystaan kaar shaqo ogolaansho ajinabi oo ah B, C, L ama dhalasho Swiss ah
- Koorsooyinkooda ma bixiso hay'ad kale (tusaale ahaan xafiiska arrimaha bulshada, adeegga caymiska dadka hawlgabka ah ee AHV-IV, kan RAV, kan SUVA, iyo kan shaqaale)
- Waxaay ku qasban yihiin inay xaadiraan koorlada ugu yaraan boqolkiiba siddeetan muddada ay socoto iyadoo dib loo eegayo waqtigi la soo dhaafay, tusaale ahaan markii koorso la bogo, wax qiimo dhimis oo la celin karo malaha.

Haddii aad buuxiso shuruudahan codsigaagana la aqbalo, dugsiga luuqadda waxaa looga baahan yahay inuu bixiyo infooys kaasoo tusaya qiimaha lagaa dhimay. Dhimitaanka waxaa loo isticmaali karaa dugsiga Jarmal oo la aqoonsan yahay oo kala duwan ee Canton.

Ka dooro dugsiga la qoonsan yahay [liiska](#) buuxina [foomka codsiga](#) adigoo raacinaya dugsiga luuqadda si aad u hesho qiimo dhimista koorlada. Dugsiga ayaa u gudbin doono codsigani iyo ogolaanshahaaga Xafiiska Arrimaha Bulshada. Wixii macluumaad dheeri ah waxaa laga heli karaa shabakada Canton ee www.deutschkurse.sg.ch.





Hanaanka lagu helo heerarka la door bidayo



1. Ka qayb galayaasha Koorsada ee loo soo gaabiyo (CPT) waxay iska diiwaangelinayaan dugsiga.

2. CPT waxaay ka xaqiijinayaan dugisga luuqadda iyo Xafiiska Arrimaha Bulshada ee loo soo gaabiyo (OSA) in shuruudaha la buuxiyay.

3. Codsiga waxaa u gudbinaya Xafiiska OSA dugsiga luuqadda iimayl ahaan. Codsiyada si joogto ah ayaa loo gudbin karaa. Si kastaba ha ahaatee, tani waa in la diyaariyaa inta aan la gaarin waqtiga koorsada ay dhamaanayso. waxaa la aqbalayaa oo kaliya codsiyada la gudbiyay iyadoo la isticmaalayo foomka codsiga rasimaga ah ee Xafiiska OSA.

4. Codsiga waxaa eegaya Xafiiska OSA saddex usbuuc gudahood (laga billaabo waqtiga codsiga la helay). Dugsiyada luuqadda waxaa si naxariis leh looga codsanayaa inay ka joogaan infooys bixinta muddadan saddexda usbuuc inta lagu guda jiro. Haddii dugsiga luuqadda uusan ka helin wax macluumaad ah Xafiiska OSA oo iimayl ah saddexdan usbuuc gudahood (laga billaabo waqtiga codsiga la helay), qiimaha la door bidayo waa la bixinayaa sida loo codsaday. Laga soo billaabo waqtigi la soo dhaafay, tusaale ahaan marka koorsada la bogu, wax qiimo door bidid oo la codsan karo ma jirto.

5. Xafiiska OSA wuxuu xaq u leeyahay inuu eego macluumaadka uu qoray Ka Qayb Galaha Koorsada (CPT) uuna codsado dokumentiyo quseeyo arrintani.